

SOOMAALIYA

XAQIIQYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO – DISEEMBAR 2020



FUDUDEYNTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA



- **528,118** oo bukaan ah ayaa ka faa'iideystay barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah oo ka dhacay **29** xarun caafimaad.
- **16,624** ayaa lagu daweyay barnaamijka daweynta bukaan socodka (OTP).
- **24,581** oo baaritaano ah ayaa ka dhacday qolalka gargaarka deg-degga ah ee 4 isbitaal oo ay ICRC-du taageerto
- **2,944** bukaan ayaa daryeel ka helay labada xarumood ee dajinta xaaladaha bukaannada ee Baydhabo iyo Kismaayo.
- **651** oo ah ka faa'iideystayaasha barnaamijka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa loo gudbiyay isbitaallo xaalad deg-deg aha awgeed ama si ay u helaan daryeel gaar ah iyada la bixiyay qarashka gaadiidka isbitaalka lagu geeyay.



A JAWAABIDDA CUDURKA SHUBAN BIYOODKA BA'AN EE DILLAACAY

- **85,706** qof ayaa ka qeyb galay kulamada kor u qaadidda caafimaadka, iyada oo **11,740** guri la booqday si loo siiyo xog ku saabsan ka hortagga shuban biyoodka.
- Barnaamijyo dhinaca raadiyaha ah oo ku saabsan ka hor-tagga shuban biyoodka daran ayaa laga sii daayay **11** idaacadood.
- **58,372** ka faa'iideystayaal ah ayaa helay fariimaha gaa gaaban oo looga hortagayo shuban biyoodka daran.
- **85,706** cusbada fuuq-celinta afka ah (ORS) iyo **14,803** kaniiniga Zinc ayaa laga qeybiyay xarumaha caafimadka SRCS, halka **26,369** xabo oo saabuun ah loo qeybiyay ka faa'iideystayaasha.
- **3,798** qof ayaa laga daaweeyay shuban biyoodka daran xarumaha caafimaadka SRCS.



127 meelo gacmaha lagu dhaqdo ah ayaa la sameeyay, halka in ka badan **57,471** liitar oo koloriin ah loo isticmaalay ujeedooyin jeermis dilid ah iyo **182,939** xabo oo saabuun ah oo laga qeybiyay **29** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah.

Fariimaha ka hortagga caabuqa Covid-19 ayaa si maalin ah looga baahiyay **12** idaacadood oo wadanka oo dhan ah.

April ilaa Juun 2020.

415 mutadawiciin SRCS ka tirsan iyo **394** shaqaalaha caafimaadka ah oo ka tirsan xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa lagu tababaray fariimaha ka hor-tagga Covid-19; **917** shaqaalaha caafimaadka ah oo ka shaqeeya isbitaallada Madina, Keysaneey, Beydhabo iyo Kismaayo ayaa la tababaray sidoo kale.

82,493 kulamada kor u qaadista caafimaadka ayaa la gaarsiiyay in ka badan **752,646** qof oo jooga Banaadir, Jubada hoose, Gedo, Hiiraan, Shabeelada hoose, Shabeelada dhexe, Galgaduud iyo gobollo kale; **15,044** kulamo ah ayaa lagu qabtay isbitaallada, iyada oo la gaarsiiyay **108,766** oo qof.

Meelaha kala saaridda iyo hubinta oo buukanada lagu baaro ayaa laga sameeyay **29** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah, halkaas oo shaqaalaha SRCS iyo mutadawiciin kale loo tabaray in ay caawiyaan barnaamijka kormeerka bulshada iyo dabagalka bukaanada.

Tababar ku saabsan shaqada iyo shaqaalaha, xakameynta caabuqa, maareynta xaaladaha, isticmaalka qalabka ilaalinta shaqsiyadeed, ayaa la siiyay isbitaallada Baydhabo Kismaayo iyo Keysaneey. Waxaa sidoo kale la siiyay qalab caafimaad, daawo iyo qalabka ilaalinta shaqsiyadeed.

FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH IYO ADEEGYADA NADAAFDDA



- **225,029** qof ayaa ka faa'iideysta **8** nidaamyada biyaha ah oo bixinaya biyo nadiif ah.
- **7** Farsamayqaan oo ka tirsan Hey'adda Horumarinta Biyaha Puntland ayaa la siiyay qalabka kaluumeysiga, tababar iyo qalab koronto.
- **26** Howlwadeenada ceelasha ee Hey'adda Horumarinta Biyaha Puntland oo ka socda **10** meelood oo kala duwan ayaa lagu tababaray dayactirka ceelasha waxaana la siiyay qalab ay wax ku farsameystaan.
- **3,216** ka faa'iideystayaal ah ayaa fursad u helay biyo nadiif ah oo la cabi karo oo ay ka heleen **8** ceel gacmeedyo ah ka dib daadadkii ka dhacay magaalada Baladweyne dhammaadkii sanadkii 2019.
- **3,600** oo ka faa'iideystayaal ah ayaa waxaa hagaagay fursadda ay u heystaan in ay helaan biyo la cabi karo iyaga oo biyaha ka helay dib u habeyn lagu sameeyay meelaha ay meraan biyaha gu'gu iyo tobbooyinka biyaha gaarsiya magaalada Qandala ka dib duufaantii Gati ee ku dhufatay Puntland.
- **681** arday ayaa ka faa'iideystay howlo kor loogu qaadayo nadaafadda guud laba dugsi oo ku taalla magaalada Muqdisho, iyada oo loo dhisay musqulo, meelo gacmaha lagu dhaqdo, iyada sidoo kale mid ka mid ah dugsiyada loogu deeqay dhalooyin biyaha nadiifiya iyo dhismo loo sameeyay.
- **3** sadex xarumood oo daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo ku yaalla Afgooye, Galinsoor iyo Balcad oo maalintii lagu baarayay **207** qof ayaa gabi ahaanba dib u habeyn iyo dib u dhis lagu sameeyay.
- Howlo wax lagu dayac tirayo si loogu fududeeyo kooxda isbitaalka Kismaayo in ay dayac tiraan qalabka muhiimka ah, sida: matoorka, mashiinka bullaacadaha nadiifiya, hagaajinta nidaamka tamarta ayaa la dhaqan galiyay.



84,182 mutadawiciin SRCS ka tirsan fariimo looga hortagayo Covid-19, iyaga oo sidoo kalena ugu deeqay saabuun iyo koloriin in ka badan **690,732** dadka deegaanka ah iyo barakacayaasha ku nool Ceel Waaq, Baardhere, Dhoobleey, Afgooye, Marka, Kismaayo, Beydhabo, Balcad, Jowhar, Muqdishu iyo Beledweyn.

Qeybaha baarista iyo karaantiilka bukaanada caabuqa Covid-19 ee isbitaalka Kismaayo ayaa la dhisay **15** sariirood halka isbitaalka Keysaneey loo sameeyay **10** sariirood.

ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH



- ICRD-du wax ay diiwaan galisay kiisaska eedeymaha ku saabsan xadgudubyada Sharciga Caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyada oo ka doodday si qarsoodi ah oo laba geesood ah oo ujeedkeedu yahay in laga ilaaliyo dadka rayidka ah dhibaatooyinka ka dhasha colaadaha hubeysan iyo rabshadaha.
- **5** farriimood oo kor loogu qaaday helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka aan xadidneyn iyo amniga xarumaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ayaa laga sii daayay idaacadda aagga Kismaayo laga bilaabo Diseembar 2020 ilaa Janaayo 2021.
- Farriimo muhiim ah oo kor luugu qaaday daryeelka caafimaadka ayaa lagu qoray darbiyada isbitaalka Keysaneey.
- Caawimaad lacageed ayaa la siiyay **10** kiis si loo caawiyo **30** qoys si ay uga soo kabtaan dhibaatooyinka gaarka ah ee ka soo gaaray colaadaha iyo rabshadaha. Two qoys ayaa ka faa'iideystay barnaamijka dhaqaale abuurka loo sameeyay si ay noloshooda dib ugu bilaabaan.



HAGAAJINTA XAALADDA NOLOLEED EE MAXAABIISTA IYO IN SI WANAAGSAN LOOLA DHAQMO



- ICRC-du waxa ay booqatay **4** goobood oo maxaab9iis lagu hayo oo ay ku jiraan **1,339** maxaabiis ah si loo qiimeeyo xaaladooda nololeed iyo sida loola dhaqmo. **33** ka mid ah maxaabiista ayaa si gaar gaar ah loola socday loona booqday.
- **1,300** oo maxaabiis ah ayaa la siiyay qalabka nadaafadda iyo casharro ku saabsan nadaafadda **3** goobood oo ka mid ah meelaha maxaabiista lagu hayo sanadkii 2020 oo dhan.
- **2** guddi nadaafadeed ayaa laga sameeyay **2** goobood oo maxaabiista lagu hayo.
- **56** maxaabiis ah ayaa xaaladooda nololeed hagaagtay iyada oo loo hagaajiyay musqulo, meelo lagu qubeysto qolalka dhexdooda, iyad oo sidoo kale ay hagaagtay hawada meesha ay ku noolyihiin iyo fursadda ay u heystaan hawada furan.
- **1,271** maxaabiista Muqdisho ah ayaa ka faa'iideystay olole lagula dagaalayo jeermiska ka dib markii uu dillaacay cudurka shuban biyoodka ba'an.
- Walxaha aan cuntada loo isticmaalin (busteyaal, joodariyaal iyo marooyin kaneeco) ayaa loogu deeqay **2** goobood oo ay ku jiraan isugeyn **700** oo maxaabiis ah.
- **600** maxaabiis ah ayaa ka faa'iideystay sameynta beerta xabsiga iyo tababarka habka wax loo beero, iyo sidoo kale barnaamijka **3**-bil ah ee ka jawaab celinta qeybta cuntada dheeriga ah **1** goob oo maxaabiis lagu hayo.
- **4** booqashooyin gaar ah ayaa lagu tagay **1** xabsi qiimeyn caafimaad awgeed iyada oo loogu deeqay **03** xirmo oo dharaha, **01** xirmo oo dawo ah, **100** xabo oo bacaha meydka ah, **100** gacmo-gashiga barista ah iyo **50** maskarada qalliinka ah; iyada oo sidoo kale ICRC-du ay talooyin af qoraalba leh ay la wadaagtay.
- Agab caafimaad ayaa loogu deeqay ilaalada xabsiga taas oo ay ka faa'iideysteen **2** xabsi oo ay ku jiraan ku dhawaad **1200** oo maxbuus .



4,558 oo isugu jira maxaabiis iyo shaqaalaha xabsiga oo **24** ka kala socday ayaa saabuun qubeys iyo saabuunta dharka lagu dhaqdo, oomo, meelaha gacmo-dhaqashada, xirmooyin ah qalabka ilaalinta shaqsiyadeediyo waliba qalab kale oo kala duwan sida gaari gacammo, badeelo iyo xaaqimmo, caagagga qashinka iwm. Kulamada xogta ee ka hortagga Covid-19, oo ay la socdaan boorar ayaa la siiyay **24** xabsi.

In ka badan **1,600** af-xir iyo **300** xabo oo gacmo-gashi ah iyo qalab loogu talo galay in laga sameeyo **200** xabo oo ah waxyaalaha wajiga ilaaliya oo la alifay ayaa la siiyay mas'uuliyiinta xabsiga.

Deeqo la xiriira Covid-19 ayaa la siiyay **2** xabsi dhexe oo ka kooban **100** xabo oo bacaha meydka ah, **100** dharka shaqada ah, **2,000** oo gacmo-gashi ah, **1,000** maaskarad qaliinka ah, **500** maaskarada wajiga ilaalisa ah, iyo xirmo qalabka caafimaadka aasaasiga ah oo dabooleysa baahida **1,000** maxbuus muddo **3** bilood ah.

8 taleefanka gacanta ah iyo **8** siim kaar ayaa la siiyay **6** xabsi si loogu suuro galiyo maxaabiista in ay qoysaskooda la xiriiraan. Isugeyn, **506** maxaabiis ah ayaa ka faa'iideystay soo celinta xiriirka qoyska inta lagu jiray hakinta booqashooyinka qoyska.

10 talooyin qoraal ah ayaa lala wadaagay mas'uuliyiinta heer fadaraal iyo dhammaan dowladaha xubnaha ka ah tallaabooyinka ka hortagga faafitaanka caabuqa iyada oo la ixtiraamayo maxaabiista sharaftooda bani'aadamnimo.

SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA (RFL)



- ICRC-da ayaa gacan ka geysatay soo celinta xiriirka xubnaha qoyska iyada oo taageero ka heleysa SRCS-ta waxaana la is dhaafsaday **120, 205** farriimaha Laanqeyrta Cas ah (RCMs), fududeynta **94,594** wadahal taleefoon ah, adeegyada dabagalka oo gacan ka geystay in la helo **171** qof iyo baahinta **4,562** oo magac barnaamijka "dadka maqan" ee idaacadda BBC qeybteeda Af Soomaaliga oo ay ku jirto ururinta kiisas cusub oo ah raadinta wajiga.
- **2,375** wadahal taleefoon ah ayaa la fududeeyay, oo la socoto qeybinta buskutka BP-5 iyo dhalooyinka biyaha nadiifiya ayaa la gaarsiiyay muhaajiriinta kuwooda nugul ee marinka socdaalka bariga.
- Kooxo ka tirsan Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed qeytiisa soo celinta xiriirka qoyska ayaa lagu qalabeeyay agabka nadaafadda, oo ay ku jiraan saabuunta gacmaha buufiska jeermis dilaha ah oo loogu talo Taabletyada iyo taleefannada, halka **300** oo haamaha biyaha ah lagu xiray xafiisyada soo celinta xiriirka qoyska, si loo hubiyo sii socoshada adeegyada (RFL-ka) ee marinka socdaalka bariga.
- Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ayaa ka sameeyay qiimeynta soo celinta xiriirka qoyska **18** ka mid ah xerooyinka barakacayaasha oo ay ku noolyihiin **8,620** qoys gudaha Moqdishu.
- **9** wicitaano nooca loo VCT ayaa la fududeeyay oo dhexmaray qoysas Soomaaliya jooga iyo **2** maxbuus oo dibadda ku xiran.
- **20** farriimaha aqbaarta qoyska ah oo loogu gudbiyay qoysaska maxaabiista taleefoon, **11** farriimaha ICRC-da ah ayaa la is dhaafsaday, iyo **8** ogeysiisyo ah ayaa loo sameeyay muwaadiniinta ajnabiga ah wakiiladooda diblomaasiyadeed.



200 oo ah boorar ay ku qoranyihiin farriimo muhiim ah oo ku saabsan ka hortagga faafitaanka caabuqa ayaa loo qeybiyay degsiimooyin ay daganyihiin tiro badan oo muhaajiriin ah oo ku kala sugan Berbara, Boosaaso iyo marinka socdaalka bariga.

Hagaha Covid-19 iyo talooyinka farsamo eek u saabsan maareynta meydadka iyo aasidda sharafta leh ayaa lala wadaagay mas'uuliyiinta iyo qalabka ilaalinta shaqsiyadeed oo loogu deeqay Muqdisho iyo Hargeysa (**5000** oo ah dharka nadaafadda, **5000** oo ah dharka dharka laga dul gashado, maasgarada FFP3, **1000** bacaha meydka ah iyo **400** oo sanduuq oo gacmo-gashi nadiifa ah).

meelaha gacmo-dhaqashada ayaa laga sameeyay **8** ka mid ah xerooyinka barakacayaasha Muqdisho iyo **4** ka mid ah xerooyinka barakacayaasha Beydhaba halkaas oo SRCS-tu ay bixineyso adeegyo taleefan ee soo celinta xiriirka qoyska oo lacag la'aan ah.

BIXINTA GAR-GAAR DEG-DEG AH IYO SOO CELINTA NOLOSHA



- **159,048** qof ayaa helay deeqo lacageed oo ujeedo badan si loo daboolo baahidooda deg-degga ah.
- Qoondo cunto ah ayaa la siiyay in ka badan **53,496** oo qof.
- **36,864** qof ayaa lagu caawiyay foojarro ay ku iibsadaan alaabta cuntada.
- **29,854** oo ah caruurta ka yar **5** sano iyo **10,177** dumar uur leh ama nuujinaya ayaa ahaa dumarka ka qey galay barnaamijka quudinta dheeriga ah waxaana la siiyay dawooyinka kala ah (plumpy sup and CSB plus) sida ay u kala horreeyaan.
- **59,574** qof ayaa lagu caawiyay alaabta geyaha ee aasaasiga ah (EHI)
- **94,290** qof ayaa la siiyay jawaanada ciidda oo la isaga ilaalinayo daadadka.
- **16,614** qof ayaa lagu caawiyay deeqaha soo kabashada beeraha.
- **13,524** qof ayaa lagu caawiyay tababarka xirfadaha ganacsiga iyada oo sidoo kale la siiyay lacago ay ku bilaabi karaan ganacsiyo yar yar.
- **1,500** qof ayaa lagu caawiyay tababar iyo qalabka kalluumaysiga
- **1,440** qof ayaa lagu caawiyay tababar iyo qalabka dhaqashada shinnida
- **3,414** qof ayaa lagu caawiyay lacago ay ku iibsadaan qalab ay ku shaqeystaan
- **726** qof ayaa la siiyay mashiinada miraha dhulka lagu galiyo
- **180** farmashiyaha dawada xoolaha ee gaarka ah (PVP) shaqaalaha caafimaadka xoolaha ee bulshada (CAHW) ayaa lagu caawiyay alaabta caafimaadka xoolaha iyo foojarro ay wax ku iibsadaan
- **15** ah iskaashatooyinka beeraha ayaa la siiyay **13,725** oo kiilo oo ah waxyaabaha la beero iyo tababarro ku saabsan abuurka aasaasiga ah iyo soosaarka calafka.



495,864

KA FAA'IIDEYSTAYAAL AH

Isugeyn **495,864** ka faa'iideystayaal ah ayaa loo diiwaan galiyay barnaamijyada gar-gaarka iyo hab-nololeedka oo ay ku jiraan kuwo helay lacag caddaan ah iyo caawimaad kale ayaa la xaqiijiyay.

HUBINTA XISAAB CELINTA DADKA DHIBAATADU GAARTAY



Xarunta Xiriirka Bulshada (373):

- Isugeyn **6,239** farriimo ah ayaa la helay oo la habeeyay iyada oo loo marayo nambarka bilaashka ah ee (373) meelo badan.
- **59%** (**3,685**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay barnaamijka sugnaanta dhaqaalaha oo laga helay Jubada dhexe (**617**), Hiiraan (**584**), Banaadir (**500**), Sanaag (**437**), Baay (**414**), Gedo (**381**), Shabeelaha hoose (**156**), Sool (**125**) iyo shabeelaha hoose (**121**) gobol.
- **39%** (**2,449**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay barnaamijka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah waxaana laga helay Gedo (**572**), Jubada hoose (**491**), Banaadir (**369**), Baay (**346**), Hiraan (**225**), Bakool (**209**) iyo Galgaduud (**159**) gobol.
- **2%** (**105**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay kor u qaadista nadaafadda biyaha iyo deegaanka waxaana laga helay Gedo (**45**), Jubada hoose (**45**) iyo goobo kale.



5,359 qof ayaa la siiyay macluumaad ku saabsan ka hortagga Covid-19 iyada oo loo marayo Xarunta Xiriirka Bulshada (373).

Dabagalka dadka ayaa lagu sameeyay xarunta wicitaanka bulshada ICRC. **1,012** xiriir oo lala xiriirinayo **551** kiisas laga shakisanyahay ayaa lagu dabagalay Muqdisho, Baydhabo, Kismaayo, Baardheere, Ceel Waaq, Beledweyne iyo **13** meelo kale.

FAAFINTA AQOONTA IYO KOR U QAADISTA MABAADII'DA BANI'AADAMNIMADA IYO IHL



- In ka badan **6,000** oo ah hogaamiyayaasha bulshada, haweenka, dhalinyarada, ka faa'iideystayaasha iyo mutadawiciin ka tirsan SRCS ee gobolada Hiiraan, Baay, Bakool, Sool, Sanaag, Bari, Mudug iyo Gedo ayaa lagu wacyi galiyay mabaadii'da aasaasiga ahlaguna wargaliyay howlaha iyo barnaamijyada ICRC iyo SRCS.
- **775** oo ah xubno ka tirsan ciidamada qalabka sida, kuwa amniga iyo booliska ayaa la baray sharciga caalmiga ah iyo mabaadii'da baniaadannimada.

ICRC waxa ay caawisaa dadka oo dhan oo ay saameeyeen colaadaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha, iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda, ugana yareyso dhibaataadooda, iyada oo kaashashaneysa saaxiibada Laanqeyrta cas iyo Bisha Cas. Ururku waxa uu kaloo doonayaa in uu ka hortago dhibaataada isaga oo dhiirrigalinaya oo xoojinaya sharciga bani'aadamnimada iyo iyaga ooh hor kacaya mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

ICRC offices in Mogadishu, Kismayo, Garowe,
Baidoa, Jowhar, Guricel and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, March 2021

 facebook.com/ICRCAfrica
 twitter.com/ICRC_Africa

 instagram.com/icrc_afrique
 blogs.icrc.org/Somalia

ICRC